



Gacaliye:

Waxaan warqaddan kuugu soo qoreynaa inaan kula socodsiino qorshahayaga aan radhoon kaga baareyno dhuddadaada. Home Forward waxay ka gudubtay qayb kamid ah nidaamka baarista, yareynta halista markii loo baahdo, iyo dib uga baarista dhammaan guryahayga dadweynaha radhoon. Shaqadan waxaa la dhameystiri doonaa kamadameysta dhammaadka 2020. Waxaan weli ku jirnaa geedi-socodka u diyaarinta baaritaan duddadaada, waana kula soo socodsiin doonaa macluumaad dheeraad ah markii aan helno. Waqti xaadirkan, waxaan dooneynaa inaan kula socodsiino waxa aad filan karto, iyo hababka loo yareeyo ku jiritaanka macquulka ah ee radhoon duddadaada.

Waa maxay radhoon?

Radhoon waa gaas dabiici ah oo kaah ah oo aadan arki, urin ama dhadhamin karin. Waxaa laga helaa dhulka dunida oo dhan, wuxuuna ka galaa dhismeyaasha dildilaacyada sagxadaha iyo derbiyada, daloolada tuubbooyinka iyo sagxadaha lalmada, iyo aagaga kale ee dhismeyaasha kuwaasoo gaasku kala kulmo iska caabinta ugu yar ee gelitaanka. Markuu jiro, waxaa inta badan laga helaa goobaha ku dhow dhulka, sida sagxadaha dhismaha iyo sagxadaha hoose ee guriga, dhismaha duddada ah ama dhismo kasta ee kale.

Waa maxay halista caafimaad?

U baylah noqoshada heerarka radhoon ee sareeya dhowr sano waxay kordhisaa halista kansarka sambabka. Wareegista hawada, sida furida daaqadaha ama albaabada, ayaa caawineysaa yareynta radhoon. Warqadani waxaa ku jira macluumaad ku saabsan hababka loo dhimo halista radhoon iyo halisyada kale caafimaad ee ka jira gurigaaga.

Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

- Weebsaydkayaga ah <http://www.HomeForward.org/RadonInfo>, ay ku jiraan siyaasadayada randoon, Su'aalaha Aalaaba Lana Weydiiyo, turjumaada warqaddan oo ku qoran luqado kala duwan, iyo xiriiriyeyaasha dhigaalada kale.
- Weebsaydka Maamulka Caafimaadka ee Oregon: <https://www.oregon.gov/oha/PH/HEALTHYENVIRONMENTS/HEALTHYNEIGHBORHOODS/RADONGAS/Pages/healthrisks.aspx>
- Weebsaydka EPA: <https://www.epa.gov/radon>

Waxaan kala shaqeynaynay wariye warbixin ku saabsan radhoon iyo maamulada guryeynta dawladda ee dalka oo dhan. Waxaan rajeynaynaa in Home Forward ka soo muuqan doonto

maqaalkan. Waxay noqon kartaa mid walaac badan inaad akhriska iyo daawashada wararka ka ogaato wax ku saabsan shay saameyn kara gurigaaga, waxaana kaa rabnaa inaad hesho dhammaan xaqiiqooyinka ku saabsan waxa Home Forward ay sameynayso iyo sababta ay u sameynayso. Radhon kuma koobna guryaha dawladda, balse waxaan dareensannahay inay muhiim tahay inaan sameeyno tijaabadan oo aan hubinno in guryaha Home Forward ay leeyihiin heerar aad u yar oo radoon ah.